

Iyadoo lala kaashanayo Barafasoor Shoba Sivaprasad Wadhia, Xarunta Sharciga lagu talagalay Xuquuqda Soogalatooyasha ee Penn State

Xayiraada Muslimiinta 3.0 – Xaashida Xaqiiqda

(Setembar 26, 2017 – La bedeli karo)

Qodobadaha Xayiraada Muslimiinta uu Madaxweynaha Trump u soo saaray ee safaro lagu xadiidaya dadka u dhashay lix wadaan ay Muslimiinta u badanyihiin waxaa loo qorshayay in ay dhacdo Setembar 24, 2017, Madaxweynaha Trump wuxuu siidayay fariin rasmi ah taasoo si dadban xayiraada kusoo roogay dhowr wadan waxayna xayiraad dheeraad ah u keentay wadamada kale. Fariinta rasmiga waxay meel marinaysa xayiraad cusub taasoo ka reebta shakhsiyadaha ka timaada siddeed wadan – oo ay hadda kamid yihiin Chad, Kuriyada Waqooyi, iyo Venezuela waxaana reebaan Suudan – waxayna xadiidaad gaar ah kusoo roogaysa wadan kasta. Sharcigan cusub ee la soo cusbooneysiisay malahan taariikhda dhammaadka. Fariinta rasmiga Madaxweynaha Trump waa iskudaygiisa ugu dambeyay uu isku dayayo inuu fuliyo ballankiisa doorashada si uu xayiraada u saaro gelida Muslimiinta Maraykanka..

Wadamaddee Diirada La saara iyo Qaabke?

Xayiraada cusub waxay hadda diirada saaraysa shakhsiyadaha ka yimaada 8 wadan. **Suudan waa laga saaray weerinkan xayiraada:**

- | | |
|--|---|
| <ul style="list-style-type: none">○ Chad: Soo gelitaanka Maraykanka ee muwadiniinta u dhashay Chad oo soogalootiyaasha iyo martiyaasha kumeel gaarka ah, ganacsadayaasha ama dalxiisayaasha wala joojiyay. | <ul style="list-style-type: none">○ Syria: Soo gelitaanka Maraykanka dhammaan muwadiniinta u dhashay Syria oo soogalootiyaasha iyo dadka aan soogalooti ahayn wala joojiyay. |
| <ul style="list-style-type: none">○ Iran: Soo gelitaanka Maraykanka ee muwadiniinta u dhashay Iran oo soogalootiyaasha iyo martiyaasha kumeel gaarka ah wala joojiyay <u>marka laga reebo</u> muwadiniinta u dhashay Iran oo ku galayaan fiisoyinka F, M, iyo J. Kooxdan oo la sheegay waxaa laga yaaba in la marsiyo baaritaan adag. | <ul style="list-style-type: none">○ Venezuela: Soo gelitaanka Maraykanka ee qaar kamid ah sarakiisha dawlada Venezuela iyo xubnaha qoyskooda ee martiyaasha ganacsadaha ama dalxiisayaasha wala joojiyay. |
| <ul style="list-style-type: none">○ Libya: Soo gelitaanka Maraykanka ee muwadiniinta u dhashay Libya oo soogalootiyaasha iyo martiyaasha kumeel gaarka ah ganacsadayaasha ama dalxiisayaasha wala joojiyay. | <ul style="list-style-type: none">○ Somalia: Soo gelitaanka Maraykanka ee muwadiniinta u dhashay Soomaaliya ee soogalootiyaasha wala joojiyay. Muwadiniinta Soomaaliyeed oo doonaya in ay Maraykanka galaan oo aan soogalooti ahayn waxaa la marsin baaritaan dheeraad ah. |
| <ul style="list-style-type: none">○ North Korea: Soo gelitaanka Maraykanka dhammaan muwadiniinta u dhashay Kuriyada Waqooyi ee soogalootiyaasha ama dadka aan soogalooti ahayn wala joojiyay. | <ul style="list-style-type: none">○ Yemen: Soo gelitaanka Maraykanka ee muwadiniinta u dhashay Yemen ee soogalootiyaasha iyo martiyaasha kumeel gaarka ah ee ganacsadayaasha ama dalxiisayaasha wala joojiyay. |

Yaa u kalma Soogalootinimo?

Soogalootiyaasha waa kuwa doonaya in ay Maraykanka galaan si joogto ah iyagoo u marayan xubin qoyska, loo shaqeeyaha Maraykan, ama Barnamijka Bakhtiya-nasiibka.

Yaa u kalma kuwa aan soogalootiga ahayn?

Dadka aan soogalootiga ahayn waa kuwa doonaya in Maraykanka ay galaan si kumeel gaarka ah, sida martiyaasha ganacsiga, dalxiisayaasha, ardayda, ardayda soo wareegaya, iyo shaqaalahayaasha kumeel gaarka ah.

Ma maxay Xadaynta oo Taariikhaha ay Dhaqangalayaan?

Xadaynta shuruudo bey ku xirantahay. Fariinta rasmiga waxay khuseysa muwadiniinta ka yimaada wadamada la saamayay kuwaasoo codsanaya fiiso.

- Fariinta rasmiga waxay si degdeg ah ugu dhaqangalaysa kuwii ay saamaysa Xayiraada Labaad ee Muslimiinta (marka laga reebo Suudaan) iyo kuwa aan xiriir saxda la lahayn qof ama shirkad Maraykanka ku taala. Tani waxay dhaqangalaysa 3:30 galabnimo EST taariikhda markay tahay Setembar 24, 2017.

Iyadoo lala kaashanayo Barafasoor Shoba Sivaprasad Wadhia, Xarunta Sharciga lagu talagalay Xuquuqda Soogalatooyasha ee Penn State

Waa maxay xiriirka saxda ah?

Muwadiniinta ajnaabiga kuwaasoo sheeganaya in ay “xiriir saxda ah” la leh qof ama shirkad ku taala Maraykanka waxa kamid ah:

- Shakhsiyadaha leh xiriir qoys oo dhow gudaha Maraykanka. Tani waxaa kamid ah waalidiinta (ay kamid yihiin xiddid iyo waalidiinta labaad), lamaanayaasha, haween aad saaxiib la tahay, carruur (ay kamid yihiin xiddid), carruurta aad walaalo tihiin (ay kamid yihiin xiddid), caruurta aad hal dhinac walaalo ku tihiin, awoowayaasha/ayeeyayaasha, carruurta aad awoowo/ayeeyo u tahay, eedoyinka/habaryayaasha, aderayaasha/abtiyaasha, gabdhaha aad eedo/habaryar u tahay, wiilal aad ader/abti u tahay, iyo ilma adeerayaasha/ilma abtiyaasha.

Yaa ka reeban Xayiraada Cusub?

- Deganayaasha sharciyaysan oo joogtada ah (kuwa haysta Green Card);
- Kuwa la diiwaangeliyay ama sii sharaf leh loo dayay markii taariikhaha ay dhaqangalayso oo la dhaafay oo kujira Qaybta 7aad ee Fariinta rasmiga;
- Kuwaa haysta dukumeenti saxda ah – tus. waraq gaadiidka, waraqda saxda ah ee raacida baaburta, ama dukumeenti sii dayn sharafeed – taariikhda ay dhaqangalayso Fariinta rasmiga;
- Muwadiniinta haysta dhalasho laba wadan markuu shakhsiga leeyahay baasaboor ay bixisay wadan aan la saamayn;
- Kuwa ugu safraya fiisoyinka dibloomaasiga sida fiisada G;
- Kuwa la siiyay magangalyo, la diiwaangeliyay ka qaxooti ahaan, ama la siiyay fasax hawlgab ah.

Fariinta rasmiga ee Madaxweynaha Trump waa iskudayga ugu dambaysay ee ku doonaya in uu fuliyo ballanqaadkiisa olole si xayiraada loo saaro Muslimiinta si aysan u galin Marakaynka.

Yaa codsan karaa Waraqda reebitaanka ee hoos timaada Xayiraada Cusub?

Sida waafaqsan Qaybta 3aad ee Fariinta rasmiga, waraaqadaha reebitaanka waxaa lagu bixin karaa durufaha soosocda:

- Marki gelitaanka loo diidayo waxay dhib aan loo baahnayn ku dhacaysa muwadiniinka ajnaabiga ah gelitaankoodana khatar uma keeni karto amniga wadanka ama badqaabka dadweynaha, waxayna tahay danta wadanka; iyo
- Nidaamka kiis kiis ah. Waraaqadaha reebitaanka kiis ka kiisa ah waxaa laga yaaba in si habaysan loo bixinin, laakin lagu bixin karaa siyaabaha shakhsiga ah sida:
 - Kuwaa dhowaan la diiwaangeliyay iyo kuwa ka baxsan Maraykanka;
 - Kuwaa haysta xiriirada la aqoonsan karo gudaha Maraykanka laakin wakhti-xaadirka ka maqan Maraykanka ee taariikhda ay dhaqangalayso;
 - Kuwaa doonaya in Maraykanka ay ganacsi wayn ka bilaawan ama waajibaadyada shaqo;
 - Kuwaa doonaya in ay booqdaan ama la nooladaan xubin qoys oo u dhow oo diidmadiisa sabaabi karaa dhibaato aan loo baahnayn;
 - Ilmaha sakhiirinta, ilmaha yar, ilmaha lasoo korinayo, ama u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah ama kuwaa leh durufaha gaarka ah;
 - Kuwaa ay shaqalaysiisay dawlada Maraykanka; iyo
 - Kuwaa ujeedkooda safarka ay tahay ganacsi lala galayo dawlada Maraykanka ama wakiil u ah hay'adaha qaar ah ee caalamiga ah.